
# Guryo guud oo la wada helo

## Arar

Warbixinta soo socotaa waa mid guud oo tusaale ah. Waxay khusaysaa badi ururrada guryaha, haseyeeshee ururrada guryaha qaarkood ayaa yeelan kara xeerar kale oo aan ahayn kuwa halkan lagu magacaabay, sababtuna waa waxyaabo ay ka mid yihiin , inay si ka duwan kuwa kale u habaysan yihiin. Sidaas awgeed waxaannu ka codsanaynaa ururrada guryaha iyo qof kasta oo guri deggenba inay la socdaan arrintaas.



# Tusmo

Soo dhawayn

1. Degenaanshaha guryaha guud
    - 1.2 Xuquuqda iyo waajibaadka

2. Adeegga iyo wargelinta
    - 2.1 Maamulaha xaafadda
    - 2.2 Guddida maamulka xaafadda
    - 2.3 Maamulka sare ee shirkada
    - 2.4 Shaqaalaha dhaqdhaqaaqyada socda, shaqaalaha arrimaha bulshada ee guryaha iwm.

3. Kiraynta
    - 3.1 Xeerka asaasiga ah
    - 3.2 Kala mudnaanta
    - 3.3 Xeerarka fudud ee kiraynta
    - 3.4 Xeerarka xidhiidhsan
    - 3.5 Diidmada
    - 3.6 Kala beddelashada
    - 3.7 Sii kiraynta

4. Soodegid
    - 4.1 Deebaaji
    - 4.2 Heshiiska kirada (lejekontrakt)
    - 4.3 Xaaladda guriga marka la soo degayo
    - 4.4 Warbixinta soo degidda
    - 4.5 Bixinta kirada
    - 4.6 Koranto/dabka, biyo iyo kulayl
    - 4.7 B*ixinta konrantada, biyaha iyo kulaylka*

5. Kabidda kirada
    - 5.1 Yaa la siiyaa?
    - 5.2 Sidee loo helaa kabidda kirada?
    - 5.3 Soo dirida lacagta kabidda kirada
    - 5.4 Dakhliga dhaqaale oo is bedela

6. Caymiska
    6.1 Khasaare soor.
    6.2 Cayminta khasaaraha aad gaysato
    6.3 Qiimaha

7. Dimuqraadiyada xaafadda
    7.1 Kulammada dadka deggan xaafadda
    7.2 Hawlgaladda dadka deggan xaafadda
    7.3 Derisnimada
    7.4 Xeerka guryaha
    7.5 Haysashada xawayaanka
    7.6 Balakoonadda

8. Guriga gudihiisa.
    8.1 Daryeelka guriga inta la deggan yahay
    8.2 Kharibidda guriga
    8.3 Qalabka jikada ee guriga
    8.4 Talaagadda
    8.5 Qaboojiyaha-barafka (fryseren)
    8.6 Shooladda iyo saxannada dheriga
    8.7 Foornada
    8.8 Makiinada qiiqa qaada
    8.9 Saxanka-Dhiska iyo anteenada
    8.10 Qalabka korontada
    8.11 Ubadka iyo korontada
    8.12 Qaraxa ama gubashada waayirada korontada
    8.13 Tashiilida isticmaalka tamarta, iyadoo la ilaalinayo deegaanka
    8.14 Sidaas ayaa loo tashiilaa korontada iyo kulaylka
    8.15 Sidaas ayaa loo tashiilaa biyaha marka raashin la karinayo iyo marka la is nadiifinayoba
    8.16 Hawo furid, laydhin
Uumiga ka baxa biyaha
    Dhaawaca dhididka uumigu guriga u gaysto iyo jeermiska ka dhasha
    Waana arin wax laga qaban karo

9. Hagaajinta guriga (råderet)

10. Aagga guriga
- 10.1 Dhaqida iyo engejinta dharka
- 10.2 Makiinadaha dhar dhaqida iyo kuwa qalajiya dharka
- 10.3 Qashin
  - Qashinka cunada
  - Qashinka waaweyn
  - Qashinka khatarta ah
  - Beeteriyada
- 10.4 Dib u isticmaal
  - Waraaqaha
  - Dhalooyinka
  - Qashinka dhirta


11. Ka guuridda
- 11.1 Marka guriga la iska fasaxayo
- 11.2 Waa la guuri karaa ka hor
- 11.3 Wareejinta guriga marka laga guurayo
- 11.4 Kormeerka guriga marka laga guurayo
- 11.5 Xisaabxidhka deybaajiga

12. Guddida dacwadaha ee ka dhexeeya dadka xaafadda deggan

## Soo dhawayn

Waxanu kuugu hanbalyeynaynaa gurigan cusub. Waxanu rajaynaynaa inaad ka heli doonto deegaankan cusub iyo guryaha shirkadaba. Waxaa buugan ku faahfaahsan, macluumaad khuseeya gurigan, iyo guud ahaan guryaha ay shirkadani leedahay. Shirkadan oo idin kalkaalin doonta mudada hore.

Wuxuu buugani ka sheekaynayaa sida ay nolosha guryaha shirkaduhu tahay, waxaanad ka heli doontaan macluumaad daruuri ah iyo talooyin haboon, oo khuseeya xuquuqdaada iyo waajibaadka lagaa rabo inaad ka soo baxdo, intaad deggan tahay guryaha guud ah.




# 1. Degenaanshaha guryaha guud

Guryahani waa kuwo loogu talo galay dadka oo dhan, waxana dakhli ahaan dhaqaalahooda bixiya dadka kiraystay ee xaafadda wada deggan. Kiraystayaasha ayaana xor u ah, inay qorsheeyaan maamulka xaafadda iyo wixii ay u arkaan inay munaasab u tahay.
Sharcigu waxa uu qorayaa inaan cidina ka faa´idin guryaha caamka ah.
Waa in kirada guriga lagu jaangooyo in ku siman kharashaadka ku baxa dhisnaanta guriga iyo maamulkiisa.
Qaybaha kala duwan ee guryaha caamka ah waxaa maamula ururka guryaha, xaafad kastana waxaa laga doortaa gudi u gaar ah, guddidaas oo metelaya xaafadda markaa maamulka guud ee ururka shirkadu shirayo.
Ugu yaraan hal mar sanadkii, ayey guddida xaafadu isugu yeedhaan shir xaafadeed, kaas oo dadka xaafaddaas deggan oo idil lagu casuumo, si ay ra´yigooda uga dhiibtaan, amaba u soo siyaadiyaan fikrado wax ku ool ah oo horumariya nolosha xaafadda. Qaar badan oo ka mid ah ururada guryaha ayaa soo saara joornaal-xaafadeed, kaas oo laga akhrisan karo waxa xaafadda ka jira ama ka dhaca, iyo waliba go´aamadii lagu gaadhay shir-xaafadeedka iyo wixii ka soo siyaada maamulka guud  ee shirkada guryaha.
Waxay guryaha caamka ahi noqon karaan, kuwo hoose oo sida fiillooyinka u dhisan(*aan is dulsaarayn*), isku garabdhisan, abartemintiyo, guryaha dhalinta, waayeelka. Qaarkood way cusubyihiin qaar kalana waa duug.
Hadii aad guri ka deggantahay shirkada, waxaa sahlan inaad mid kale ka dalbato isla shirkada. Hadii aad rabto guri kale waa inaad iska diiwaan geliso liiska guryo sugida ee shirkadaas. Qoysaska caruurta leh waxay mudanyihiin in iyaga loo horaysiiyo guryaha waa weyn. Faahfaahinta kiraynta ka akhri 3

## 1.2 Xuquuda iyo waajibaadka

Waxaa shahaadada kontraktiga guriga ku qoran, waxa aad xaq u leedahay iyo sidii aad uga soo bixi lahayd waajibaadka ku saaran. Waa in la bixiyaa kirada guriga, korantada, kulaylka, iwm. Waqtiga loo qabtay. Eeg qaybta 7.3. Dhamaan guryaha caamka ah waxay leeyihiin, xeer xafadeed (*qawaaniin xaafaddaas u gaar ah)* waxaana go´aamiya dadka xaafadda deggan. Waana in la xurmeeyo xeerarkaas, aana lagu xagdgudbin, haday tahay deegaanka guud ee xaafadu wadaagto iyo ka gaarka ahba.



# 2. Adeegga iyo macluumaadka

Hadaad u baahato caawimo ama aad qabto su´aal khusaysa gurigaaga, waxaad la soo xidhiidhi kartaa mid ka mid ah maamulada hoos ku xusun.

- Maamulaha xaafadda
- Guddida maamulka xaafadda
- Maamulka sare ee shirkada

## 2.1 Maamulaha xaafadda

Waxuu maamulaha xaafadu u shaqeeyaa shirkada guriga maamusha, si uu u daryeelo xaafadda. Hadii aad la kulanto wax dhib ah oo khuseeya deegaanka, waxaad si kalsooni leh caawimo uga heli doontaa maamulaha xaafadda. Waxaa sida caadiga ah jirta inuu leeyahay waqti go´an oo uu maalintii fadhiyo xafiiska. Hadii ay kugu yimaadaan wax dhib ah oo wayn, sida tuubooyinka biyaha oo qarxa, waa inaad wacdaa lambarkii lagu siiyey markaad soo degtay.


## 2.2 Guddida maamulka xaafadda

Waxaa guddidan doortay dadka deggan xaafadda. Xubnaha gudiguna mushaar ma laha, balse waxay ku shaqeeyaan si iskaa wax u qabso ah, iyagoo hadafkoodu yahay inay wanaajiyaan Wada noolaanshaha dhaliyaana daris wanaag, iyo inay fuliyaan xiisaha iyo rabitaanka bulshada deggan xaafadda. Dhamaan wixii ku lug leh firfircoonaan ka jirta aagga xaafadda, waxaad kala hadli kartaa guddida xaafadda. Waxaa sidoo kale gudigu u xilsaaran yihiin inay dhex galaan dariska haduu is afgaranwaa soo dhexgalo.
Xaafaddaha aadka loo degganyahay ee shirkadaha qaarkood ayaa waxay leeyihiin, qof la taliye ah oo si joogto ah shirkada ugu shaqeeya, caawiyaana xaafadda.

## 2.3 Maamulka sare ee shirkada

Waxaa maamulka sare ee shirkadu qabtaa dhamaan, wixii khuseeya bixinta kirada guriga, kulaylka, biyaha, korontada iyo wixii la mid ah.


## 2.4 Shaqaalaha dhaqdhaqaaqyada socda, shaqaalaha arrimaha bulsheed ee guryaha iwm.



Ururrada guryaha qaarkood ayaa shaqaaleeya dad shaqadodu tahay, inay taageeraan hawlaha bulsheed ama meelmariyaan hindisayaasha horumarineed ee la goaansaday, iyadoo la kaashanayo dimuqraadiyadda dadka xaafadda deggan.

Shaqaalaha arrimaha bulshada ee guryuhu waxay ka shaqeeyaan laamaha leh qorshe guud oo la aqoonsan yahay, waxana ay xidhiidhiyaan dadka guryaha deggan, maamulka iyo khubarada hawlwadeennada ah, ee ka shaqaynaya horumarinta xaafadda.

Iyadoo qayb ka ah dadaalka socda, waxaa sidoo kale la shaqaalaysiin karaa qof ka shaqeeya dhaqdhaqaaqyada socda ama dhaqanka, kaasoo ay tahay inuu horumariyo oo gacanqabto hawlaha bulsheed, isagoo la kaashanaya dadka xaafadda deggan. Hawlahaasi waxay noqon karaan tusaale ahaan dhaqdhaqaaqyo loo sameeyo carruurta iyo dhallinyarada, oo ay kaga qaybqaadan karaan lacag la’aan ama qiimo jaban.



# 3. Xeerarka kiraynta


Hoos waxaa lagu xusayaa xeerarka ugu muhiimsan ee kiraynta. Waxaa la tilmaamayaa, inay suurtagal u tahay ururka guryaha, ka dib markay dawladda hoose u ansixiso, inuu dhinacyada kala duwan ee hawlihiisa u samaysto xeerar ku habboon urur guriyeed iyo dawladda hoose kasta. Urur guriyeed kastaa wuxuu ku wargeliyaa laamaha ururrada qaarkood Xeerarka ay sameeyaan.

## 3.1. Xeerka asaasiga ah

Qofku waa inuu 15 jir gaadhay, si loogu qoro liiska sugitaanka helitaanka guryaha guud, waana inuu fiida bixiyaa sannadkiiba mar si uu liiska sugitaanka ugu jiro.
Dhammaan ururrada guryuhu waxay leeyihiin laba liis sugitaan: liis loogu talagalay dhammaan dadka aan markaas deggenayn mid ka mid ah laamaha shirkadda. Liiskaas waxaa la yidhaahdaa liiska sugitaanka ee debedda. Marka liiskaas lagu jiro, waxaa guri lagu helaa, hadba muddada liiska sugitaanka lagu jiray.
Markuu qofku deggan yahay isla shirkadda (ururka guryaha), ee uu rabo guri kale, qofka waxaa lagu qoraa liis kaloo sugitaan. Liiskan waxaa la yidhaahdaa liiska sugitaanka dallacaada (oprykninsventelisten). Waxaa guri lagu helaa, hadba muddada lagu qornaa liiska sugitaanka.
Marka aqal laga codsanayo <u>urur</u> guriyeed, waa inuu qofku xubin ka noqdaa ururka, oo la siiyaa lanbarka xubinnimada. Marka qofku rabo, in la tixgeliyo codsigiisa guriga, waa inuu ka mid noqdaa urur guriyeedka, dabadeed waa in qofka loo diiwaangeliyaa, inuu si firfricoon guri u doonayo. Lanbarka xubinimada ayaana markaas, loo adeegsadaa diiwaangelinta, muddada la sugayo guriga.
Marka guri laga codsanayo <u>shirkadda</u> guryaha, maalinta la isku qoro liiska sugitaanka ayaa loo adeegsadaa diiwaangelinta, muddada la sugayo guriga.

## 3.2. Kala Mudnaanta

Ka sokow ku qornaanta liiska sugitaanka, dadka qaarkood ayaa xaq u leh in xagga hore laga geliyo liiska sugitaanka guryaha qaarkood. Taas macnaheedu waxaa weeye, in si gaar ah loogu tixgeliyo guryaha oo laga horraysiiyo codsadayaasha kale.



Qofka carruur leh, waxaa si gaar ah loogu tixgeliyaa guryaha saddexda iyo afarta qol ah. Arrintaasi way saamaysaa hadduu qofku kelidii carruurta wato iyo marka waalidka kale weheliyaba.
Qof kastoo kelidii ahi wuxuu xaq u leeyahay guri laba qol ah. Ururrada guryaha qaarkood ayaa qoyska aan carruurta lahayn siiya guri saddex qol ah. Guddida ururka guryaha ayaa qaata arrintaas goaankeeda.
Waayeelka iyo dadka naafada ah ayaa xaq u leh in loo tixgeliyo guryaha qoysaska (familieboliger), ee sida gaarka ah loogu talagalay kooxdaas.

## 3.3. Xeerarka kiraynta ee fudud

Kiraynta fudud macnaheedu wuxuu yahay, in koox khaas ah si gaar ah loogu tixgeliyo laamo gaar ah. Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa in tixgelin gaar ah la siiyo dadka ka shaqeeya soohdinta kommuunaha gurigu ku yaal , ee deggan kommuune kale.
Xeerarka la fududaynayo, waxaa ka heshiiya kommuunaha iyo ururka guryaha, oo komuunaha ayaa baahiya xeerarkaas.

## 3.4. Xeerka xidhiidhsan


Xaafadaha guryaha qaarkood oo ay ku badan yihiin dadka aan ku jirin suuqa shaqada, waxaa suurtagal ah in aan guryaha laga kirayn dadka aan si firfircoon ugu jirin suuqa shaqada. Qofkaas waxaa markaa loo tilmaamaa guri ku yaal laan kale.
Wasaaradda arrimaha bulshada ayaa sannad walba soo saarta xaafadaha ay xeerarkani khuseeyaan.

## 3.5. Diidmada

Ururka guryuhu wuxuu goaansan karaa, inay ugu badnaan 2 qof degaan qolalka guri kasta.
Xeerkani wuxuu khuseeyaa marka guriga la oggolaanayo iyo sidoo kale marka loo soo guurayo.

## 3.6. Kala beddelashada

Qofka raba inuu gurigiisa ku bedesho guri kale, taasi waa suuragal, hadduu qofku gurigiisa deggenaa ugu yaraan 3 sano. Xeerka la xidhiidha baaxadda gurigu ayaa xoog u muuqda marka guryaha la kala beddelanayo . Taasi waxay ka dhigan tahay, in qof kelidii ahi beddelan karo guri 4 qol ah. Waxaa kaloo suuragal ah in ururka guryuhu diido kala beddelashada, haddii guriga ay degayaan tiro ka badan 2 qof qolkiiba. Kala




beddelashada waa la sii daynayaa labada guriba, labada gurigana waxaa loola dhaqmayaa in laga baxay oo la soo degay. Eeg qaybta 4 iyo 11. Guriga la soo degay, waxaa laga bixinayaa carbuun (deposit) cusub.

## 3.7. Sii kiraynta

Sii kiraynta qayb ka mid ah guriga:
Qofku xaq  buu u leeyahay, inuu sii kireeyo qayb ka mid ah gurigiisa. Waase inaan tirada dadka guriga deggeni ka badan tirada qolalka guriga.

Sii kirayta guriga oo dhan:
Qofku xaq buu u leeyahay inuu sii kireeyo gurigiisa ilaa 2 sano, hadduu ku qasban yahay inuu meel kale u dego sababo ay ka mid yihiin xanuun, safar ganacsi, dhoof waxbarasheed, ama guuritaan kumeelgaadh ah oo shaqadu ku kelliftay. Qofka guriga kiraynayaa wuu horjoogsan karaa sii kiraynta, haddii qolalka guriga ay deggayaan dad ka badan 2 qof. Qofka guriga kiraynayaa sidoo kale wuu horjoogsan karaa sii kiraynta, hadduu hayo sababo maangal ah, oo uu ku qanco.
Heshiiska sii kirayntu wuxuu dhex marayaa kireeyaha iyo qofka guriga sii kiraysanaya. Ururka guryuhu waa inuu helaa nuqul ka mid ah heshiiska, intaan sii kirayntu biulaabmin.



# 4. Soodegid

## 4.1 Deybaaji


Marka la helo guri waxaa la dhigaa daybaaji. Lacagta daybaajigu waa mid kuu soonoqondoonta marka aad guriga ka guurto. Kasakoow hadii aad qabto qaan, sida kirada bil aanad bixini, lacag dheeraad ah ood u isticmaashay Kulayl ama koronto Iwm. Waxaa intaas dheern dayactirka wixii dayacaad ah eed u gaysatay guriga intaad degenayd.
Kommunahaa laga codsadaa inuu ku amaahiyo deybaajiga ama uu ku siiyo balanqaad daymeed. Waana in arintaas lagu deg degaa marka aad guri hesho. Waxaa qofku caawimo khusaysa deybaaji heli karaa, marka dakhligiisa dhaqaale uu hooseeyo. Wixii faahfaahin ah ee intaas dheer waxaad ka heli kartaa jornaalka shirkada cutubkiisa "Deynta deybaajiga". Waxa la helaa, isagoo af dheenish ah. Ama kala xidhiidh kommuunahada siday suurtagal u tahay amaahda deebaajigu.

## 4.2 Heshiiska kirada (lejekontrakt)

Heshiiska ijaarku waa mid u dhexeeya kiraytaha iyo shirkada. Waaxana la saxiixaa in qofku helay guri kiro ah oo caam ah. Waxaa kontrakga ku faahfaahsan waxyaabaha aad xuquuqda u leedahay iyo waajibaadka ku saaran adoo kirayste ah. Iyo in shirkadu ka soo baxdo heshiiska qaybteeda.
Heshiiska kiradu waa mid qaynuuni ah. Taas oo micnaheedu yahay inay kiraystaha iyo kireeyuhuba ka soo baxaan dhinacooda waajibaadka saaran.

## 4.3 Xaaladda guriga marka la soo degayo

Waxay guryaha guud leeyihiin laba sifood oo loo dayactiro: Qaabka-A iyo kan B.
Markaad ku soo guurto gurigaaga cusub, waa la dayactiray iyadoo kharashka ku baxay la xisaabinayo qofkii horay uga guuray, Iyadoo ay ku xidhantahay heshiiska iyo qaabka maamul ee xaafadu dooratay.
Hadii la doorato habka-A, Waxaa soo baxaya in darbiga la rinjiyeeyo ama warqad cusub la saaro. Saqafkana waxaa sida caadiga ah la mariyaa rinji, Gurigana waa la nadiifiyey. Dhamaan waxyaabaha kale ee gurigu waa kuwo la dayactiro oo kaliya hadii ay dayacnaayeen.
Hadiise la doorto habka-B, waxaa guriga lagu soo degaa siduu yahay, siduu ahaa markii laga guuray oo qofkii hore u degganaan jiray uu wareejiyey. Taas oo sababta inaan darbiyada iyo saqfka toona la dayactirin. Wuxuu gurigu leeyahay sanduuq dayactireed, taas oo loo isticmaalo dayactirka guriga iyadoo lagala heshiinayo maamulka shirkada.



## 4.4. warbixinta soo degidda.

Markaad soo degto guri kiro ah, waxaad adiga iyo shirkadu si wadajir ah u kormeeri doontaan guriga iyo sida uu agabkiisu yahay inta aanad la wareegin. Waxaa la sameeyaa warbixin lagu qoro xaalada guriga, taas oo adiga iyo shirkaduba wada saxiixdaan.
Hadii ay wax qaldanyihiin ama maqan yihiin, waa in lagu qoraa warbixinta. Si aan laguugu qabsan dayactirka qalab aanad adigu dayicin.

## 4.5 Bixinta kirada


Waxaa sida ahrciga ah kontraga ku qoran, goorta kirada la bixinayo. Hadii lala soo daaho, waxaa la dulsaaraa lacag dheeraad ah. Hadii aan lagu degdegin bixinta kirada kadib marka la helo warqada digniinta ah, waxaa dhici karta in xuquuqdii kiraystaha lagala noqdo. Taas oo micnaheedu yahay in guriga si deg deg ah looga guuro. Shirkada gurigu waxay sheegtaa sida iyo goorta la bixinayo kirada. Habka ugu dhib yar ee loo bixiyo waa in banka loo xilsaaro bixinta lacagta kirada, oo si joogto ah u bixiya bil kasta xiligii loogu talo galay, sida habka PBS.

## 4.6 Koranto/dabka, biyaha iyo kulaylka

Si looga fikiro bii´ada iyo tashiilka biyaha iyo korontada iyo kulaylka , oo Denmark aad ugu qaali ah. Waxay dawladu ka qaadaa canshuur iyo lacago kale oo dulsaar ah isticmaalka tamarta, waxaana aad loogu dadaalayaa sidii hoos loogu dhigi lahaa isticmaalka biyaha iyo korontada. Waxaa sidaas awgeed maamulka shirkada guryaha guud uu macaamiishiisa wargeliyey tashiilida tamarta.
Waxaa guryaha oo dhan ku yaal saacad cabirta isticmaalka korontada, qaarna kulaylka. Waxayna cabiraan isticmaalkaaga kulka iyo korantada. Guryaha qaarbaa leh saacad biyaha cabirta.

## 4.7 Sidaas ayaa loo bixiyaa - korantada

waxaa sida caadiga ah la bixiyaa lacag go´an oo toos loo siiyo shirkada. Taas oo loo xisaabay bishiiba ama sedex biloodkiiba qiyaas go´an. Cadadka lacagtaas la bixiyana waxay had iyo jeer ku xidhantahay isticmaalku sanad kahor siduu ahaa. Hadii isticmaalku ka bato intii la qiyaasay waa la kordhiyaa iyadoo la is wargelinayo mudo ah hal bil.
Sanadkiiba hal mar ayaa xisaab xidh la sameeyaa. Iyadoo la akhriyayo saacada guriga, oo tusisa inta isticmaalku ahaa tan iyo markii ugu danbaysay ee la akhriyey.




Shirkada korantadu waxay soo dirtaa kaar, kaas oo la buuxinayo loona celiyo shirkada. Waa muhiim in kaarkaas la soo celiyo. Hadaan la soo celin, waxay shirkadu qiyaasi doontaa isticmaalka korantada, amase waxay shirkadu soo dirsan doontaa dad u akhriya, si loo ogaado isticmaalka koranto ee gurigaas. Hadii qofku isticmaalay in ka yar qiyaastii, waxaa u soo noqota lacag, hadii ay ka badatana, waxaa loo soo raacdaa daalac.

## -kulka

Waxaa sida caadiga ah la bixiyaa qiyaas go´an. Taas oo bil kasta kirada la soo raaciyo. Qiyaasta isticmaalkuna wuxuu ku xidhanyahay hadba siduu isticmaalku ahaa, qofkii horay u degganaan jiray. Hadii isticmaalku ka bato sidii la qiyaasay, waxaa sare loo qaadaa qiyaasta, iyadoo mudo bil ka hor ah lagu soo wargelinayo.
Waxaa sida caadiga ah akhriya saacadaha hiiterka, ninka maamula xaafadda sanadkii hal mar. Waxaana la soo diraa xisaabxidh lagu soo qoro xisaabtii kulaylka ee sanadka oo dhan. Waxaana sidoo kale la soo celiyaa lacag hadii isticmaalku yaraa, ama lacag dheeraad ah hadii isticmaalku badnaa.

## - biyaha

Hadaanu gurigu lahayn saacad cabirta biyaha, isticmaalka biyaha waxaa lala bixiyaa kirada.
Haduu gurigu leeyahay saacad cabirta biyaha, waxaa la akhriyaa sanadkii mar. Qiyaasta lacagta la bixiyana waxaa lagu jaangooyaa natiijada ka soo baxda akhriskaas ama isticmaalka biyuhu intay dhamaayeen sanad ka hor. Waxaana la bixiyaa lacag go´an. Taas oo bil kasta ama sedex-biloodkiiba mar la soo diro. Hadii isticmaalku kobco waxaa sare u kacaa lacagtii bilaha ahayd, iyadoo lagu soo wargelinayo mudo hal bil ah.



# 5.Kabidda kirada

Kabidu waa gargaar dhaqaale oo la siiyo qofka deggan guri kiro ah. Waxaa lasiiyaa qofka kirada gurigu ay qaali ku tahay marka loo eego dakhliga dhaqaale. Waxaa lacagta kabidda bixiya Kommunaha. Sanadkiiba halmar ayaa dib loo eegaa lacagtaas kabidda.
Hadii qofku ku jiro hawlgab, waxaa lacagtan loogu magacaabaa Gargaar. Dadka kalena waa kabitaanka kirada. Qawaaninnta labadaas musaacido way kala duwanyihiin.

## 5.1 Yaa la siiyaa?

Dadkoo dhami ma heli karaan kabidda guriga. Waxayse had iyo jeer ku xidhantahay hadba sida xaalada dhaqaale ee qofka/qoysku tahay, iyo inta ay kiradda gurigu le´egtahay. Iyo waliba tirada dadka guriga deggan ama inta qof ee qoysku ka koobanyahay iyo inta gurigu le´egyahay.

## 5.2 Sidee loo helaa kabitaanka kirada?


Marka la codsanayo kabidda kirada, waxaa la buuxiyaa foom u gaar ah, kaas oo laga helo shirkada ama Kommunaha. Waxaana loo codsadaa sida ugu dhakhsaha badan kadib marka kontraga la sixiixo. Qofba sida uu ugu deg dego ayaa kabiddu ugu soo hormartaa. Waa in la codsado mar labaad hadii guriga laga guuro.

## 5.3 Soodirida lacagta kabidda kirada

Dadka ku nool guryaha guud, waxaa dhacda in lacagta kabidda ah toos loogu soo diro shirkadda guryaha, oo lagu soo toosiyo meesha kirada lagu xisaabo, kadibna kiradii ayaa laga jaraa iyadoo qofka loo soo dirayo jeeg ay ku qorantahay baaqigii.

## 5.4 Dakhliga dhaqaale oo isbedela

Hadii la qaato lacagta kabidda oo dakhligaagu isbedelo, kobco ama hoos u dhaco, waa in lala soo socodsiiyo xafiiska bixinta kabidda ee Kommunaha. Waxaa taas la mid ah hadii qoysku siyaado ama yaraado., Kommunuhu markiiba ma ogaan karo. Hadii qofku qaatay lacag dheeraad ah, waxaa dhacda in lacatii kabidda laga soo ceshado.



# 6.Caymiska

Waa mihiim in caymiska qoyska la iska qoraa. Waxaa caymisku bixiyaa magdhaw leh dhar, agabka guriga iyo waxyaabaha hantida guriga ah. Hadii lagaa xado iyo haday gubtaanba. Xatooyada waa in marka hore Politi-ga loo sheegaa kadibna caymiska.

## 6.1 Khasaare soor


Marka aad caymis ku jirta waxaa jira in khasaaraha qayb la bixiyo. Taas oo qofku bixiyo cadad go´an oo kharashkii khasaaraha ah.

## 6.2 Caymiska qasaaraha aad gaysato

Caymiska qoysku waa caymis daboola khasaaraha aad gaysato. Waxaa caymiskani magdhaw u fidiyaa hadii aad dhibaato u gaysato dad kale noftooda ama hantidooda.

## 6.3 Qiimaha

Qiimaha caymiska qoysku wuxuu hadba ku xidhanyahay, meesha aad wadanka ka deggantahay, iyo tayada aggabka la cayminayo.



# 7.Dimuqraadiyada xaafadda

Xeerka u yaala guryaha guud ayaa go´aamiya, in dadka kiraystayaasha matalaayi ugu bataan guddida maamulka shirkada, iyo in dhamaan xaafaddaha ay guryaha guud ka koobanyihiin laga soo doorto gudi xaafadeed, qorsheeya oo u dooda danaha xaafadda. Guddida maamulka sare ee shirkaduna wuxuu ilaaliyaa sumcada guud ee shirkada iyo maamulka sare.
Gudi xaafadeedka waxaa soo doorta dadka deggan xaafaddaas, waxaana lagu doortaa shir ay xaafadda oo dhami isgu timid. Xaafaddaha qaar bay adagtahay in la helo qof la doorto. Hadayse dhacdo waxaa maamulka la wareega guddida sare ee maamulka shirkada, ilaa inta laga soo doorto gudi-xaafadeed.

## 7.1 Kulammada dadka deggan xaafadda

Ugu yaraan hal mar sanadkiiba ayey deegaanka xaafadu go´aamiyaan miisaaniyada sanadka. Taas oo loo qabto shir xaafadeed. Guddida xaafadda ayaa soo jeediya ama soo bandhiga wixii isbedel ah ee ku yimaada miisaaniyada sanadka soo socda, tusaale ahaan hadii kiradu sare u kacdo.
Haday muhiim noqoto in sare loo qaado iyo in la dayactiro xaafadda, kasoo qayb galayaasha ayaa u codeeya in miisaaniyada lagu daro iyo in kale.
Ka soo qaybgalka shirka xaafadu wuxuu kuu soorto geliyaa, inaad saamayn ku yeelato waxa xaafadda ka jira. Waxyaabaha ay kasoo qaybgalayaashu go´aamiyaan waxaa ka mid ah, socodsiinta maamulaka iyo dhaqaalaha xaafadda sida:

- Maxaa loo isticmaalaa guriga guud ee xaafadda?
- Xiliyada ay qasaaladu furantahay iyo qiimaha dhaqida.
- In dhul cagaaran laga dhiso dhismayaasha dhexdooda iyo in kale?
- Sidee bay u egtahay goobta ciyaaraha ee caruurtu?
- Ma lagu qaban karaa koorsooyin xaafadda dhexdeeda?
- Kanaaladee laga daawan karaa anteenada TV-ga ee ku jirta xaafadda?

Waa qaar ka mid ah, waxyaabaha uu qofku ka qayb qaadan karo marka uu ka soo qayb galo shirxaafadeeka, oo uu firfircoonaado.

## 7.2 Hawlgallada dadka deggan xaafadda

Xaafdo badan ayaa qabta barnaamijyo firfircoonaan ah, oo dadka oo dhan ka dhexeeya lana qabto sanadka oo dhan. Waxaa jira kulamo looga xaajoodo hadba waxii xaafadda kucusub. Tusaale ahaan, naadi filim, Wada cuntayn, xaflado, koorsooyin iyo waxyaabo kale oo badan. Waxay guryaha



shirkaduhu intooda badan leeyihiin guryo loogu talo galay barnaamijtaas, kuwo lagu shiro ama lagu dhigto xaflad.
Ka qaybgalka barnaamijta xaafadu wuxuu keeni karaa guul aanad filanaynin, hadii aanad horay u aqoon dadka hawlahaas wada, waxaa suurto gal ah inaad barato qaarkood. Tani waxay xitaa khusaysaa dadka Denishka ah laftooda. Hadii uu qofku mar bilaabana waligii wuu ku faraxsanaadaa, waayo sida caadiga ah qofka waa la soo dhaweeyaa. Waxaana aad u mihiim ah in lala socdo waxa ka dhacaya meesha la degganyahay.

## 7.2 Derisnimo

Meesha ay dadku ku kulmaan, waxaan laga maarmin xeerar iyo qawaaniin, kuwo qoran iyo kuwo aan qoraynba. Sharciyada qoran waxaa suurto gal ah in la akhriyo oo lagu dhaqmo. Balse ku aan qorayni way adagyihiin. Hadii la waydiiyo dhenishka inay yaqaanaan sharciyada aan qorayn, waxay inta badan ku jawaabaan "Waan aqaan shuruucda" laakiin marnaba kama fikiraan ama mar iyo dhif bay ku dhaqmaan.
Waxay dadka shisheeyaha ahi intooda badani ka andacoodaan, in ay dhenishku yihiin dad aan la isku dhafi karin. Runtiina waa arin inteeda badan xaqiiq ah. Balse micnaheedu ma ah, inayna dhenishku dadka isku soo darin ama lala macaamiilin. Inta badanse waqti bay qaadataa inta nolosha la iskku fahmo qof dhenish ah. Balse mar hadii aad is barataan intooda badan, waa dad furfuran, oo si diiran u soo dhaweeya martidooda.
Balse xasuuso dhenishku waa dad aan isu tagin iyagoon qorshe lahayn, sida dhaqamada kale intooda badan ay ku caanka yihiin. Inkasta ooy u muuqdaan dad mashquulsan, hadana intooda badani waa u diyaar wixii garab qabasho ah. Sidaas awgeed ha ka gaabsan dariskaaga, hadii aad caawimo u baahato, amase aad wax uun uga baahato ama uu shaki kaaga jiro. Inta badana albaabka dariskaaga dhenishka ah waad garaaci kartaa, ood waydiisan karaa adeeg sida, sonkor, bur Iwm.
Dhenishku waa dad aan sida caadiga ah iska imaanin, iyagoon kuu soo sheegin. Balan baa la dhigtaa mudo ka hor. Inta aad ku cusubtahay deegaanka waxaa fiican inaad dariskaaga ku casuunto qaxwe. Si aad isu barataan, isbar qofka, waxaa dhici karta inaad ka faa´ido waxyaabo badan oo kuu muhiim ahaa inaad xaafadda ka ogaato. Sida xeerrarka xaafadda iyo wixii la mid ah.

## 7.3. Xeerka guryaha

Dhamaan guryaha shirkada oo idil, waxay leeyihiin qawaaniin. Waa qaynuun guud oo dadka xaafadda deggan ka dhexeeya, samayntiisana iyagu ku lug lahaayeen, waayo qofkastaaba wuxuu qabaa fikrad isaga la fiican. Waxaa



kale oo xeerkan loo sameeyey in lagu daryeelo guryaha iyo deegaanka ay ku yaalaan, iyo in laga hortago in darisku is dhibsado sida qaylo Iwm.

## Xeerrarka caadiga ah ee guryuha, sida

- Makiinada derbiga daloolisa waa in la isticmaalaa oo kaliya ilaa 19.00 fiidnimo
- Haddii aad mitalan weekend xaflad dhiganayso, waxaa haboon in loo sheego dariska arintaas.
- Sanqadha musikada ee dheer lama ogola kadib 22.00 saac.
- Hadii harqaan la tolayo, waa in la hoos dhigo maro si aan shanqadheeda loo maqlin
- Hadalka kiisa dheer iyo qayladuna waa mamnuuc.

## Guriga banaankiisa

- Waxaa kaliya oo qashinka loo ogolyahay in lagu tuuro goobaha loogu talagalay.
- Waxaa kaliya oo la ogolyahay in laxidho saxanka dhishka ama qalabka anteenooyinka, marka ogolaansho laga haysto maamulaka shirkada guriga leh. Eeg qaybta 8.8
- Waa in la daryeelaa beerta iyo ubaxaba

## 7.4 Xawayaanka-gurijoogta ah

Guryaha qaarbaa maamulka dadka guryaha deggeni ogolaadaan in lagu dhaqan karo bisad ama Eey.

## 7.5 Balkoonka

Hadii aad balkoon leedahay, waa inaad hubsataa in biyo shukiisu nadiif yahay. Haday dhuunta qaada biyaha, xidhaan caleemo iyo qashin kale waxaa dhici karta, in guryaha kaa hooseeya ay soo gaadho waxyeelo biyahaasi gaysteen. Waxaa intaas dheer in balkoonka had iyo jeer laga rabo inuu nadiif ahaado, si uu araga dadka u qanciyo.
Wixii khuseeya qawaaniinta xaafadda waxaad weydiin kartaa maamulaha xaafadda, hadii aad wax ka shakido. Isagaa had iyo jeer u xilsaaran inuu kuu sheego waxa saxada ah iyo waxa aan ahayn.



# 8.Guriga gudihiisa

## 8.1 Daryeelka guriga inta la degenyahay

Waa wax wanaagsan in lagu noolaado meel la daryeelay, dibada iyo gudahaba. Sidees awgeed waa inay kiraystayaashu ku dadaalaan daryeelka guri-gooda intii karaankood ah.
Waxay shirkada guryuhu xilkeeda qaadaa, dayactirka iyo cusboonaynta: Biyaha, makiinadaha gaaska, muraayadaha, sabuuradaha korantada, musqulaha, gacmo-dhaqa iyo baafka lagu qabaysto. Waxaa iyana sidoo kale la daryeelaa qaboojiyeyaasha, makiinada raashinaka, tan dharka dhaqda iyo wixii la hal maala ee guriga ku rakiban..
Waa in qofku daryeelaa dhamaan agabkan, qofku wuxuu dayaco isagaa bixinaya dayactirkiisa. Hadii agabka guriga loo isticmaalo wax aan loogu talogelin, oo dhibaato soo gaadho, isagaa qofku bixiya dayactirka agabkaas ama bedelaadooda, haday muhiim noqoto.
Hadii la isku dayo in guriga dayactir lagu sameeyo, oo aan loo dayactirin sidii loo baahnaa, siduu farsamo yaqaanku u samayn lahaa oo kale, waxaa la yiraahdaa dayacaad qaldan, oo qofkaa iyana laga rabaa inuu bixiyo lacagta ku baxaysa dayactirkaas.
Hadii qofku isagu la yimid qaboojiyaha iyo waxyaabaha la hal maala, isagaa laga rabaa inuu bixiyo kharashka ku baxa daryeelkooda.
Guryaha lagu deggo habka-A, waa in qofku daryeelaa saqafka, darbiyada iyo alwaaxa dhulkaba, inta uu guriga degganyahay.
Hadiise aad degto guryaha lagu maamulo habka-B, shirkada ayaa u xil saaran daryeelka hawshaas. Waxaa suurto gal ah in la helo lacag lagu dayactiro hawshaas, hadii koontada guriga lacagi ku jirto.

## 8.2 Kharibidda guriga

Qofku isaga ayaa bixinaya, hadduu si fiican u dhawri waayo, alaabada guriga.
Haddii qofku alaabada guriga u isticmaalo, wax aan loogu talogelin, oo ay ku jajabaan, markaas qofka ayaa bixinaya qarashka lagu beddelayo ama lagu samaynayo.
Hadduu qofku isku dayo inuu wax ka beddelo xaaladda guriga, oo uu si fiican u samayn kari waayo, sida waxyaabaha nijaarku sameeyo, markaas waa hagaajin qaldantay, oo qofka laftiisa ayaa bixinaya qarashka dib loogu hagaajinayo.

Hadduu qofku keensado tallaajad iwm, qofka laftiisa ayaa bixinaya qarashka Wixii la beddelo guriga.



## 8.3 Qalabka jikada

Marka la soo dego guri cusub, waxaa haboon in la barto isticmaalka qalabka jikada ee gurigaas yaala. Waxaa la bartaa isticmaalkooda marxaladaha kala duwan iyo xanaanaynta qalabkaas. Hadii si haboon loo isticmaalo makiinadahan, waxaa dheeraada cimrigooda, oo mudo dheer baa la isticmaali karaa. Waxaa intaas dheer in la tashiilo tamarta iyo kharashka ku baxa korontada.

## 8.4 *Talaagadda*

Xaraaradda talaagadu waa inay noqotaa 5c garoodo. Waxaa lagu cabiri karaa xaraarada, qalabka cabira heerkulka. Waa in la hubsado in goomaha ku wareegsan albaaka talaagau yahay mid ningax fiican leh oon qabawgu ka soo bixin talaagada. Talaagada oo isticmaasha dab dheeraad ah, waxaa keena baraf kudhasha darbiyada talaagada ama boodh ku dhega talaagada xageeda danbe. Alaabta laga soo saaro talaagada barafka, waxaa haboon in talaagada caadiga ah lagu kaydiyo inta aan la isticmaalin. Taas oo hoos u dhigta isticmaalka dabka.

## 8.5 Qabiijiyaha barafka (fryseren)

Waa in heer kulka talaagadani noqdaa ugu yaraan –18 garaado. Qaboojiye madhan iyo mid alaabo ku jirto isku dab ma isticmaalaan. Daboolka talaagada ama albaabku waa inuu si fiican isu hayastaa, Waana in si joogto ah loo nadiifiyo. Hadii qaboojiyaha la dhigo meel qaboow, ma isticmaalo dab badan balse wuu tashiilaa. Waa in ay hawadu wareegto gudaha qaboojiyaha, oon alaab laga buuxindhafinin.

## 8.6 Shooladda iyo saxannada dheriga

Waa in halka ugu saraysa la geeyo dhuxusha dheriga marka shay la karinayo, kadibna si tartiib ah ayaa loo gaabiyaa ilaa iyo inta dherigu ka kargoynayo. Waa in dusuudu leeyihiin sal/gun siman, oo ay u adkaysan karaan dab bad ka badan 50% intii loogu talo galay. Iyo waliba in gunteedu le´eg yatay dhuxusha dabka. Hadii digsi yar la saaro dhuxul wayn, waxaa khasaara dab badan. Waxaa sidoo kale haboon in digsiga la saaro dabool le´eg, dabool la´aan waxay digsigu isticmaashaa sedex jeer in ka badan, sida caadiga ah. Dami dabka oo dhan shandaqiiqo ka hor inta uuna dharigu bislaanin, taas oo tashiilsha dabka. Wax ha ku dubin dhuxusha dabka dusheeda, waayo dhuxusha looguma talo gelin.



## 8.7 Foornada
Si loo tashiilo dabka, waxaa haboon in, foornada la daaro ugu horayn marka cuntada la geliyo. Sidoo kale dami 10-15 daqiiqo ka hor waqtiga bisaylka, si aad ugu faa´idaysato kulaylka qadar markaad damisay kadib. Waa qaali in foornada solay lagu dubo. Nadiifi foornada, markasta ood isticmaasho.

## 8.8 Makiinada qiiqa qaada
Waxay makiinadani qabataa inay qaado uumiga iyo urta raashinka ooy dibada u saarto. Hadii aad wax ku karinayso dhariyada oo dhan, gee halka ugu saraysa makiinadan. Waa in daaqaduhu kuu xidhnaadaan, marka aad shido makiinada qiiqa. Ugu yaraan hal mar bishiiba, ayaa la nadiifiyaa shabaqa ku jira makiinadan. Hadii shabaqu is xidho, waxaa dhacda inayna makiinadu u shaqayn sidii laga rabay.

## 8.9 Saxanka dhishka iyo anteenooyinka
Waxaa qofku xaq u leeyahay, inuu keensado saxanka dhishka oo ku xidho gurigiisa. Balse waa in shirkada la wargeliyaa inta aan arintaas lagu dhaqaaqin. Si ay shirkadu kuu tusto meesha ku haboon inaad saxanka ku xidho, si aanad dariskaaga uga qajilinin.
Hadii shirkada gurigu soo gelisay dhamaan kanaalada laga daawado saxanka, waxaa dhici karta in shirkadu diido xidhashada saxan. Hadii koox ka mid ah deegaanku rabaan, kanaalo khaas ah, waxaa suurto gal ah inay sameeyaan hal saxan ooy wada daawadaan. Hadii ay taasi jirto, waxay shirkadu qabanqaabin doontaa, shir lala yeesho maamulka anteenada. Kooxdaas isku danta ahna waa inay soo doortaan xubin matela, iyo maamul u yaala urur ay samaysteen, oo uga qayb gala shirka maamulka shirkada.
Hadii guriga shirkada lagu xidho saxan, waxaa suurto gal ah in shirkadu waydiiso deybaaji qofkaas, kaas oo lagu hagaajiyo kadib marka qofku guuro.

## 8.10 qalabka korontada
Markaad wax ka bedelayso qalabka korantada, waa inaad ka taxadartaa, hadii aanad fiiro dheeraad ah u yeelan waxaa imaan kara khasaare laxaad leh. Waxaa ka yaala xeerrar iyo qawaaniin, waxa la ogolyahay iyo waxa aan la ogolayn.

## Waxaa la oggolyahay:
- samaynta/xidhida nalalka
- bedelaada damiyaha iyo daarahu haday halaabaan
- bedelaada Fiyuuska



## Waxa aan la oggolayn:

- ka shaqaynta qalabka korontada iyadoon laga daminin xarunta dhexe ee guriga ee korontada laga damiyo, iyo in la isku xidho laba waayir, iyadoon koolo lagu duubin
- in la sameeyo kontaktiyo cusub oo nalka laga daaro/damiyo
- isticmaalka fiyuus gubtay ama mustacmal ah
- in waayirada looga tago dhulka, meesha lagu noolyahay. Taasoo dhalisa dhaawac soo gaadha waayirka, mustaqbalkana dhaliya gubasho ku timaada waayirka gudihiisa. Waa in waayirada lagu dhajiyaa darbiga ama meel aan lugtu gaadhin, sida in lagu daboolo qalabka korantada dedda.

## 8.11 Ubadka iyo korantada

Meelaha dabka laga daaro waxay khatar ku keenaan ubadka. Waxaa dhacda inay shok kala kulmaan, haday wax dabka gudbiya geliyaan kontaktiga. Waxaa fiican in la soo gato qalab lagu daboolo fiishka dabku kasoo baxo, oon ubadku isticmaali karin.

## 8.12 Qaraxa ama gubashada waayirada dabka

Waxaa guryaha oo dhan ku yaala, xarun laga maamulo ama qaybisa waayirada kala duwan ee dabka, taas oo ka hortagta gubasho ama qarax korantada ku yimaada. Xaruntan ayaa si degdeg ah isu damisa hadii qalad dhaco. Waa in ugu yaraan hal mar sanadkii la tijaabiyaa in korantadu u shaqaynayso sidii laga rabay. Hadii aanad aqoon xaruntan iyo sida loo isticmaalo, maamulka guryaha ayaa kaa caawin doona.

## 8.13 Tashiil tamarta adoo daryeelaya dabeecada/bii´ada

Waxa ugu qaalisan ee waxyaabaha tamarta loo isticmaalo gurigu waa kulaylka. Mid kalana waa dabka ama korantada. Waxaana haboon in laga fikiro sidii hoos loogu dhigi lahaa isticmaalka tamartaas, loona yarayn lahaa kharashka ku baxa tamarta.
Waxaa waliba intaas dheer in la wanaajiyo bii´ada iyo cimilada aan ku noolahay. Mar hadaan yarayno isticmaalka dabka, kulaylka iwm. Waxaa yaraanaya shidaalka ku baxa moatoorada dhaliya dabka iyo tamarta. Tashiilka dabku ma aha in aan laba isticmaalin.
Biyuhu ma aha oo kaliya wax loo isticmaalo oonbax, waxaan u isticmaalaa waxayybo badan oo nolosheenu ku tiirsantahay. Waxaanan inta badan isticmaalaa biyo aad u badan. Biyo la´aan waa nolol la´aan. Biyuhuna ma



aha wax aan dhamaanin! Meelo badan ayey biyuhu ku yaryihiin qiimahoo-duna aad u qaali yahay. Waxaa aad u qaali ah, nadiifinta biyaha wasakhoo-bay. Waxaa sidaas darteed la bixiyaa oo kirada la socda lacagta biyaha iyo nadiifintaba.

## 8.14 Sidaas ayaa loo tashiilaa Korantada iyo kulaylka

Waa in tamarta looga faa´ídaysto sida ugu caqli galsan.

- waa in la damiyo hiiterka marka guriga la laydhinayo
- waa in aan la dhigin aggab waaweyn hiiterka dushiisa ama hortiisa, ama aan daahyadu soo gaadhin hiiterka dushiisa
- waa in la damiyo nalka, mar hadaan qolkaas cidi ku jirin
- waa in aan la furin biyaha kulul, hadii aan la isticmaalayn
- waa in qasaalada dharka la buuxiyo, oon hal ama laba shay uun loo daarin

Qasaaladaha dharku waxay intooda badan isticmaalaan, tamar is le´eg, hadii dhar yar lagu rido iyo hadii la buux dhaafiyoba.

## 8.15 Sidaas ayaa loo tashiilaa biyaha Cunto karinta

Waa inaan khudaarta la diirin iyadoo ay biyuhu qulqulayaan
Khudaartu uma baahna in la waraabiyo mar hadii biyo lagu karinayo
Waa in aan la isticmaalin biyo ka badan, jalamada shaaha ama mashiinka qaxwaha marka casarriyada la karsanayo. Waa in weelka lagu dhaqo, biyo baafka ku jira oon la dhaqin tuubada oo qulqulaysa. Oo tuubada iska xidh, intaad weelka nadiifinayso.

## Nadaafada shaqsiyaadka

- Waa in tuubada lagu qabaysto, intii barkada la biyeysan lahaa
- Biyaha xidh, inta aad saabuunta timaka ku maydhayso, iyo waliba markaad cadayanayso.
- Hubso in biyaha tuubadu ayna iska dareeraynin.

## 8.16 Hawo bedelasho, laydhin

Guryaha Denmark intooda badani, waa guryo si fiican u dhisan oo qaboowga celiya. Guriga noocan ahi si fiican ayuu u tashiilaan ama u xajiyaan kulaylka. Hawada oo la bedelo waxaa lagaga nabad galaa guriga oo hawo qaboobi soo gasho. Waxaa kale oo hawo bedelashadu u fiicantahay caafimaadkaaga, sidaas darteed waxaa muhiib ah inaad hawada bedesho dhawr jeer maalintii. Waa inaan saacado badani u dhaxayn hawo bedelashada. Fur



dariishadadaha iyo albaabada mudo qiyaastii 5 ilaa 10 daqiiqo ah, si ay hawo cusub guriga u soo gasho. Musqusha iyo jikada waxaa haboon in la laydhiyo, markasta oo la isticmaalo. Xasuuso inaad hiiterada damiso, inta aad guriga laydhinayso.

## Uumiga biyaha

Qoys ka kooban 4 ilaa 5 qof waxay dhaliyaan uumi/dhidid dhan qiyaastii 15 liter maalin kasta. Taas oo katimaada xubnaha qoyska sida ( neefsashada iyo hawada ay qaadanayaan) iyo kushiinka, musqusha iyo meelaha kale ee qosku isticmaalo sida cunto karinta iyo qabayska. Waa in uumigaas guriga laga saaro. Waxaana kaliya oo uumigu ku bixi karaa in guriga la laydhiyo.

## Dhibaatada dhididka iyo jeermiska

Hadii aan hawada la bedelin, waxaa yimaada dhibaato uumigu keeno, taas oo qaali ah in la dayactiro. Dhididka waxaa jecel oo ka dhasha jeermis, kuna noolaada dhididka uumigu keenay ee ku dhasha darbiyada. Waxaa kale oo dhididku wax u dhimaa caafimaadka daka ku nool guriga, waana lagu jiradaan. Waxaa laga qaadaa xasaasiyad (ellergi) Marka qofku jiido/qaato hawo uumi la socdo.

## Waana wax qofkasta karo

Si loo yareeyo uumiga iyo dhididka, waa in la daboolaa dusuuda waqtiga cuno karinta iyo in la shido makiinada uumiga qaada. Waxaa kale oo yarayn kara dhididka in hawada la furo, marka la qabaysto kadib iyo marka qolka subaxii laga soo tooso. Waxaa kaloo mihiim ah inaanad guriga dhar ku qalajinin. Hadii ay guriga ku jiraan qalabka hawada qaada, waa in la nadiifiyaa, lana hubsadaa inay shaqaynayaa. Dhidid ku dhega muraayada gurigu, wuxuu calaamad u yahay in hawada guru uumi la liidato, oo ay haboontahay in la laydhiyo. Hadaba guriga hawada u fur.



# 9. Hawlaha wanaajinta (xuquuqda wanaajinta)


Dadka xaafadda deggeni waxay xaq u leeyihiin, inay wanaajiyaan gurigooda hoostiisa, ka dib markay la socodsiiyaan ururka guryaha, lana ansixiyo dhokumentiyada qarashka ku baxay wanaajinta, haddii aanad guurin intaan la qorin qarashka. Wanaajinta guriga lagu sameeyo waxba laga beddeli mayo, marka guriga laga guurayo. Haddii waxa laga beddelay gurigu, aanu kor u qaadayn qiimaha guriga, ururka guryuhu wuxuu codsan karaa, in guriga sidiisii lagu celiyo, marka laga guurayo.

Xuquuqda wanaajinta waxaa suuragal ah, inuu qofku tusaale ahaan samaysto kijin cuusb, oo uu doortay lacagtiisana bixiyay. Hadduu guuro, inta aanay dhammaan 20 sannadood – haddii qoraalka xisaabeed ahaa 20 sano – waxaa qofka loo soo celinayaa qayb ka mid ah xisaabtii.

Waxaa sidoo kale suuratagal ah, inaad hagaajiso ama wax ka beddesho gurigaaga hortiisa. Haseyeeshee waa kulammada laanta, kuwa goaamiya waxa la oggol yahay, in laga beddelo laanta. Kulammada laanta ayaa sidoo kale goaamiya, in la sameeyo dib u dhis.

Haddii waxa la beddelay ama wanaajinta la sameeyay keento qarash gaar ah, waxaa dhici karta in kirada la kordhiyo si loo daboolo qarashkaas.

Waxaad ka akhriyi kartaa xeererka iyo fursadaha jiraba xaashiyaha kooban ee “Råderetten – xuquuqda wanaajinta”. Waxaa la helayaa, iyagoo af dheenish ah uun.



# 10.Aagga guriga

## 10.1 Dhaqida iyo qalajinta dharka

Waxay guryaha shirkada guryaha intooda badani leeyihiin qasaalado leh qalabka wax lagu dhaqo iyo kuwa lagu qalajiyaba. Waxaa jira qawaaniin u taala qasaaladaha guud ee la isticmaalo. Waxaa kale oo shuruuc loo djiyey goorta iyo goobta dhar lagu qalajiyo.
Waa mamnuuc in caruurtu yimaadaan ama isticmaalaan qasaalada, waayo qasaaladu waxay khatar u keeni kartaa caruurta.

## 10.2 Makiinada dharka-dhaqda iyo tan qalajisa


Waa muhiim in qasaalada dhar laga buuxiyo, oon la shidin iyadoo nus ah ama badh faaruq ah. Sidoo kale makiinada qalajinta.
Qasaalada: Hadaan dharku aad u wasakhaysnayn, waxaa haboon in qasaalada lambar gaaban lagu dhaqo. Mashiinku waxuu si fiican dharka u dhaqaa, marka la nadiifiyo filterka .
Qalajisada: Hadaan filterka la nadiifinin, waxaa dhacda in mashiinku uuna si fiican u qalajin dharka.

## 10.3 Qashin

Kamuunayaasha oo dhan waxay leeyihiin meelo lagu aruuriyo, waraaqaha, dhalooyinka iyo aggabka dib loo isticmaalo.
Waxaa dhici doonta in sanadaha inagu soo fool leh, la soo rogo hab cusub oo qashinka lagu kala saarayo. Si looga faa´idaysto waxyaabaha dib loo isticmaali karo. Marka aan shay dib u isticmaalo, waxaan kaydinaa jiritaanka shaygaas. Waxaana suurto gelinaa in aan bii´adu wasakhoobin, oo shaygaas uuna qashin marnaba noqon ee yahay shay markasta loo baahanyahay. Markaad guri cusub soo degto waxaa haboon, inaad ogaato qawaaniinta qashinqubka ee degmadaas iyo meelaha la geeyo qashinka.

## Qashinka cuntada (raashinka)

Hadii aad ku nooshahay guri shirkadeed, waxaa ku yaala meel qashinka lagu rido/dhigo. Iyadoo kadib qashinkaas la gubo. Waa in qashinka oo dhami ku jiraa bac. Waa mamnuuc in qashin si toos ah loogu shubo dhuumaha qashinka qaada, iyadoon bac lagu ridin. Waxaa qashinka la geeyaa qolka qashinqubka. Qolkan looma ogola qashin ka baxsan ka jikada ama raashinka.
Hadii aad ku nooshahay guri villa ah ama kuwa loo yaqaan rækkehus, waxaa guryahaas agtooda ku yaal konteenar qashinka lagu rido.



## Qashinka waaweyn

Qashinka noocan ahi waa tusaale ahaan, saalootada, alwaaxda, kaartoomada iyo baakadaha waaweyn. Waxaana jira konteenaro qashinkan loogu talo galay, oo u gaar ah. Hadii aad waydo konteenar waxaad waydiisaa maamulaha xaafadda, meesha qashinka waaweyn la geeyo.

## Qashinka khatarta ah

Waa sida rinjiga, sunta terpentinka loo yaqaano, benzinka iyo kuwo kale oo badan oo bii´ada wax u dhimi kara. Waana in qashinka noocan ah la geeyo meeshii laga soo gatay, amase meelaha Kommunuhu uggu talogalay qashinkaas.Halkaas oo loo qaado meelo khaas ah oo lagu gubo ama lagu isticmaalo qashinkaas. waxaa kale oo qashinka khatarta ah kamid ah kiimikooyinka, saliidaha qaarkood iyo midabka ama rinjiga. Dawada dhacday ama aan mudo dheer la isticmaalin, waa in fermesiyaha la geeyo.

## Beeteriyaasha

Beetarigu waa shay khatar leh, hadii dabeecada lagu tuuro, ama hadii lagu daro qashinka la gubo oo loo diro xarumaha qashinka lagu gubo. Waxaa beetariga ku jira macdan iyo sunta dabka dhalisa oo dib loo isticmaali karo. Waxaa sidaas awgeed haboon in la geeyo dukaamada ka ganacsada iyo in lagu aruuriyo sanduuq yar oo beetariyada u khaas ah.

## 10.4 Dib u isticmaal

## Waraaqaha

Joornaalada, waraaqaha xayisiiska iyo dhamaan wixii warqad ku abtirsada dib baa loo isticmaalaa. Waxaa laga sameeyaa waraaqo cusub, waxaa sidaas darteed meel kasta yaala konteenar loogu talo galay in lagu rido warqadaha iyo joornaalada la tuurayo.

## Dhalooyinka

Dhalooyinkana dib baa loo isticmaalaa. Waxaana sidaas darteed celinaa dhalooyinka aan isticmaalo, khaasatan kuwa aan lacagta ahayn. Dhalooyinka qaarbaa leh calaamad sheegaysa in dib loo isticmaali karo, sida kuwa rahmada la bixiyo marka la gadanayo. Rahmadaas oo qofka u soo noqota kadib marka uu dhalooyinka soo celiyo.

## Qashinka dhirta

Waxaan maalin walba daadinaa qashin badan oo kan cuntada ah. Waxaana ka buuxa nafaqo iyo tamar badan oo dib loo isticmaali karo. Kommunyaasha qaar baa waxay bilaabeen inay qashinka kala saaraan oo isticmaalaan qashinka raashinka. Taas oo loo isticmaalo dheefta xoolaha ama bacriminta beeraha.
Xafiiska maamulka shirkada ama maamulaha xaafadda aad ku nooshahay ayaa ku siin doona wixii faah faahin ah ee khuseeya, kala habaynta qashinka dib loogaga faa´idaysto.

# 11. Ka guuridda

## 11.1 Fasixidda guriga

Waxaa jira qawaaniin u taala sida guri kiro ah looga guuro. Sedex bilood ka hor maraka uu qofku go´aansado inuu guriga ka guuro, ayaa guriga la fasaxaa oo ifiso la dhiibaa. Taas oo ka bilaabata 1.-da bil. Waana sida qaynuuniga ah ee guri looga guuro. Xeerkani ma jiro hadii wax kale kontraga ku qoranyahay. Noticeku ama fasaxaada kontaraagu waa inay ahaato qoraal, loona soo diro maamulka shirkada.

## 11.2 Waa la guuri karaa ka hor.


Waa suurtogal in la guuro inta aan sedexda bilood dhamaanin. Haday taasi dhacdo, waa in shirkada laga codsadaa inay guriga dhakhso u kirayso. Hadiise shirkadu waydo qof kiraysta markiiba waxaa dhacda, in qofku bixiyo kiradii sedex bilood.

## 11.3 Wareejinta guriga marka laga guuro.

Waa in guriga la nadiifiyo oo laga raro dhamaan wixii alaabo kuu taalay. Sidoo kale waxaa lagugula xisaabtami doonaa wixii guriga yaalay iyo siduu ahaa markaad soo degtay. Waana inaad furaha soo wareejisaa maalinta guriga lagaala wareegayo.

## 11.4 Kormeerka guriga marka laga guurayo


Marka la guuro, waxaa shirkada iyo qofkii guriga degganaa si wada jir ah u kormeeraan xaalada guriga. Taas oo lagu magacaabo Kormeerka Ka guuriddaa. Maamulka shirkada ayaa warqad u soo dira kiraystaha, iyagoo la socodsiinaya inay guriga kormeeri doonaan, iyo waqtiga hawshaasi dhacayso. Marka guriga laga guuro kadib ayey shirkadu go´aamisaa waxa guriga laga dayactirayo. Waxaa isla markaas la isla meel dhigaa in qofkii guriga ka guuray bixiyo dayactirkaas iyo in shirkadu bixiso. Iyadoo la raacayo qawaaniinta u taala dayacaada iyo dayactirka guriga.
Ugu danbayn 14 cisho markii guriga laga guuray eyey shirkadu soo dirtaa warbixin qoraal ah oo ku saabsan ka guuridii guriga iyo waxa laga qaban doono, inta kiraystaha laga rabo inuu bixiyo iyo sababta, iyo inta shirkadu bixinayso. Waxaa sidaas awgeed muhiim inaad xasuusato inaad cinwaankaaga cusub siiso shirkada si laguu soo wargeliyo.
Hadii aad deggantahay xaafad lagu maamulo habka-A, waxaa warbixinta geediga ku ooli doonta waxa lagaa rabo inaad bixiso, gaar haan rinjiyeynta darbiyada iyo saqafka. Waxaa kale ood heli doontaa xisaab cad ooy ku qorantahay kharashkii ku baxay nadiifinta guriga. Kharashaka ku baxa rin-



jiyeynta darbiyada iyo saqafku wuxuu hadba ku xidhanyahay mudada aad degenayd guriga. Iyadoo lacagtu yaraato sanadba sanadka ka danbeeya. Tusaale ahaan, hadaad guriga degenayd 10 sano, laguguma laha inaad bixiso rinjiyeynta caadiga ah. Hadii aad degenayd 5 sano, waxaa lagaa rabaa badh, hadiise aad wax jabiso ama dayacdo waa inaad bixiso qiimahiisa oo dhan.
Hadiise taa bilcagsigeeda aad degentahay xaafad lagu maamulo habka-B, waxba qofka looma soo raacdo inuu rinjiyeeyo ama gidaarada xaashi ku dhajiyo. Hadiise qofku haleeyo wax guriga agabkiisa ka mid ah, waa mid laga rabo inuu magdhabo qiimihii oo dhan.
Marka guriga la dayactiro ayaa qofka loo soo diraa xisaab guud, oo lagu cadaynayo waxa la hagaajiyey iyo inta lagu hagaajiyey. Waxaana lacagtaas marka hore laga goostaa deybaajigii, kadibna baaqigaa la soo celiyaa hadii qofka baaqi u soo noqdo, hadii kalana daalac.

## 11.5 Xisaabxidhka deybaajiga

Marka laga guurayo guryaha guud, waa in la sameeyaa xisaabxidh, lana xisaabo deybaajigii kaa yaalay iyo in waxa kuu soo noqonaya iyo in kale.
Hadii aad adigu iskaa isaga bixisay lacagta deybaajiga markaad soo degtay, adaa xisaabta laguu soo celin doonaa.
Haddii lacagtaas laga soo amaahday kommuunaha ama uu kommuunuhu garantii siiyay baanka, deebaajiga soo noqda waxaa dib loogu bixinayaa lacagtii amaahda ahayd. Marka sidaasi dhacdo, badi waxaa daalac noqda lacag kommunaha ama baanku kugu sii lahaanayo.
Kommuunuhu wuu kuu diidi karaa amaahda deebaaji cusub, haddii kii hore wax kaaga hadheen.



## 12. Guddida dacwadaha

Waxaa jira guddi qaada dacwadaha shacabka deggan guryaha kirada ah, waxayna ka jiraan dhamaan kommunayaasha iyo maamulka shirkada guryaha kiraysa. Waxay guddidani u dacwad qaadaan kireeyaha iyo kiraystaha. Hadii uu yimaado is af garanwaa soo dhexmara macaamisha iyo shirkada ama shirkadu dacawad ka qabto qofka guriga ka kiraystay. Dacwooyinka oo dhan guddidani ma qaadaan, waxayse qaadaan dacwooyinka ku wajahan deegaanka sida, Ku xadgudubka qawaaniinta xaafadda, dhismaha iyo qaabka guriga oo wax laga bedelo siduu ahaa markii la soo degay, bixinta kirada, kulaylka i.w.m. Isticmaalka dacwada noocan ah waxaa lagu furaa lacag gunno ah oo dhan 107. kr. Waana qiimo go´an oo uyaala guddida.

Faahfaahinta xeerarkaas waxaa laga helayaa, qoraalka kooban ee ” Beboerklagenævn”. Waxaa la helaa uun, isagoo af dheenish ah.

